

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 1 Okt. 1981 L. 10

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100

Somaaliya gudakeeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiiste waqtiga loo geeyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. balkii sadar iye waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iye qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu biximayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

SHARCI

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI L. 52 ee 11 Luulyo 1981, Oggolaan-sho dhaqangelinta Heshiis dhexmaray BOG. 1479 JDS iyo Dawladda Jam. Jabuuti.

SHARCI L. 52 ee 26 Luulyo 1981, Meelmarin Heshiis. » 1481

القانون رقم ٥٢ الصادر في ٢٦ - ٧ - ١٩٨١
اتفاقية تبادل المجرمين المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال وجيبوتي

SHARCI L. 53 ee 15 Luulyo 1981, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo » 1482 dhowr Banki iyo Shirkadda Teehnipetrol, saameeyana amaah lacageed iyo dhismo Warshadda Bacrinta Beeraha.

WAKAALADDA M. QARANKA

QAYBTA KOWAAD
XEER

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 taariikh 22
Luulyo 1981, Dhismaha Machadka Culuunta Siyaasadda:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka,

MAKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbi ga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed ee la gu guddoomiyey in la dhiso Machadka Culuunta Siyaasadda.

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in Machad kaCuluunta Siyaasaddu, isagoo ka mid noqonaya Kulliyadaha Jaamacadda Ummadda, uu yeesho maamul u gaar ah oo hoos yimaada Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed;

MARKUU ARKAY: Dhegeystana talada Wasiirka Hidaha iyo Tacliinta Sare (Warqad Lambar WHTS/QAR.10.63,taariikh 14.4.1981;

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

(Dhismaha Machadka)

1. Waxaa la dhisay Machadka Culuunta Siyaasadda oo ka mid noqonaya Kulliyadaha Jaamacadda Um madda Soomaaliyed.
2. Machadku waa Hay'adda ugu sarreysa ee Waxba rashada Culuunta Siyaasadda, Wuxuuna yeelana yaa maamul u gaar ah oo hoos imanaya Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soo maaliyed.

Qod. 2aad

(Ujeeddo)

Ujeeddada Machadku waxay tahay soo saaridda Kaadirka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaali yeed, Ururrada Bulshada iyo kuwa Dawladda.

Qod. 3aad

(Qaybaha Waxbarashada)

1. Machadku, Qaybta Jaamacadda ka sokow, Wuxuu yeelan karaa qaybo kaloo Waxbarasho oo ka hoo seeya heerka Jaamacadda.
2. Shahaadooyinka laga bixiyo qaybta Jaamacadda ee Machadka waxay la qiimo yihiin Shahaadooyin ka Kulliyadaha Jaamacadda.
3. Shahaadooyinka kale waxay la qiimo noqonayaan heerarka ay u dhigmaan ee nidaamka Waxbarasha da Dalka.

Qod. 4aad

(Aqoonsi)

Shahaadooyinka Machadka uu hore u bixiyey, Aqoonsigooda iyo heerarkooda waxaa la waafajinayaa Xeerkan.

Qod. 5aad

(Xuquuqda Barayaasha)

Borfasoorada, Barayaasha Sare, Barayaasha, Ba re—kaaliyeysaasha waqtii buuxa iyo kuwa waqtii dhiman waxay la xuquuq yihiin kuwa Laamaha kale ee Jaamacadda, waxaan lagu dhaqayaa Sharciga Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

Qod. 6aad

(Xeer Hoosaad)

Habka dejinta barnaamijyada Akadeemikada iyo kuwa kale ee Machadka, xiriirka Machadka iyo Gud doonka Jaamacadda, awoodda Golaha Dhixe XHKS uu ku yeelanayo Hoggaaminta Siyaasadda Waxbarashada Machdka iyo Xulka ardada, waxaa nadaaminaya Xee Hoosaad gaar ah uu soo saaro Madaxweynaha JDS, isa goo dhegeystay Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baa rista iyo Aydolojiyada ee Xisbiga iyo Wasiirka Wasaa radda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Qod. 7aad

(Dhaqangal)

Keerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiix • Madaxweynaha JDS. Wuxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 22 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)